

Waxaad xaq u leedahay inay kuu wargaliso degmada dugsi xuquuqda aad ku hoos leedahay Qaybta 504. Ogeysiiskani wuxuu ku saabsan yahay adiga iyo ilmahaagu xuquuqda aad ku hoos leedihiin Qaybta 504

WAA MAXAY QAYBTA 504?

“Qaybta 504” waa qanuunka dib-u-hagaajinta ee 1973, xuquuda madaniga ah ee ka difaaca qofka itaalka daran faquuqida. Qaybta 504 waxaa lagu dabaqayaa dhammaan hay’daha hela dhaqaalaha uu bixiyo federaalku, marka lagu daro Dugsiyadda Guud. Inuu u qalmo, ardaygu waa inuu lahaadowax u dhinnaan jirka ah ma maskaxda ah oo si aad ah u xaddideysa mid ama in ka badan oo ah waxqabayada nololaha ee weyn.

WAXBARASHADA ILMAHAAGA

Ilmahaaga ayaa xaq u leh inuu:

- Helo waxbarasho dowladeed lacag la'aan ah oo ku habboon.
- Ka qaybgalo oo u ka faa'iideysto barnaamijyada waxbarashada degmada bilaa takoor ahaan.
- U helo fursad siman ka qaybgalka waxqabayada tacliinta iyo kuwa manhajka ka baxsan.
- Wax la barto ardayda aan lahayn naafanimada illaa heerka ugu sarreeya ee u habboon.
- Waxa u ku barto goobaha hawlo fudeysiska ah oo u helo adeegyada u dhigma kuwa la siiyo ardayda aan lahayn naafanimada.
- Helo u waafajin iyo/ama gargaarka iyo adeegyada u oggolaanaya ilmaha fursad siman sidii u uga qaybgali lahaa waxqabadyada dugsi.
- Helo gacan-qabashada iyo adeegyada waxbarashada iyo waxa la xiriira kharash la'aan, marka laga reebo ajuurada laga qaado waalidiinta leh carruurta aan naafanimada lahayn.
- Helo adeegyada waxbarashada gaarka ah haddii loo baahdo.

DIWAANKA WAXBARASHADA ILMAHAAGA.

Waxaad xaq u leedahay inaad:

- Dib u eegto diiwaanka waxbarashada ilmahaaga iyo inaad ku hesho nuqullo qiime macquul ah. Lacag laguguma dallacayo haddii qiimihu kaa hor-istaagayo inaad fiiriso diiwaanka.
- Weydiiso degmada inay wax ka beddesho diiwaanka waxbarashada ilmahaaga haddii aad aaminsan tahay inay khalad ama habaabin leeyihiin, ama hase yeeshee ku xad-gudbayaan xuquuqda xog-dhowrka ilmaha. Haddii ay degmadu diido weydiisigan, waxaad xaq u leedahay inaad ka hor-timaad diiditaanka adiga oo codsada dhageysi eex-la'aanta ah.
- Hesho jawaabta weydiimahaaga macquulka ah ee loogu talagalay faahfaahinta iyo fasiraadda diiwaanka waxbarashada ilmahaaga.

QAABSOCODKA QAYBTA 504

Ilmahaaga ayaa xaq u leh in la qiimeeyo kahor intuu isagu ama iyadu u-qalanto hoosteeda Qaybta 504. Waxaad xaq u leedahay inaad:

- Hesho ogeysiis kahor inteysan degmadu tallaabo kasta ha ahaate ka qaadin arrimaha ku saabsan aqoonsiga, qiimaynta iyo meeleynta ilmahaaga.
- Hesho go'aammada qiimaynta iyo meeleynta aya sameeyeen koox dad ahi, oo badiyaa loo yaqaan "kooxda 504", kuna jiraan dad yaqaan ilmahaaga, micnaha macluumaadka qiimaynta, iyo kala dooradka meeleynta ee jira.
- Hesho go'aamo qiimayn salka ku haya ilo kaladuwan oo dhowr, ah sida imtixaannada aqoonta iyo guuleysiga, talooyinka macallinka, xaaladaha jirka, diiwaanka caafimaadka, iyo u fiirsiga waalidka.
- Diiddo oggolaanshaha qiimaynta hore ama meeleynta hore ee ilmahaaga.

Haddii u ilmahaagu hoosteeda Qaybta 504 uu ugu qalmo, ilmahaaga yaa xaq u leh in dib-u-qiimayn xilliyeed ah u qaato, taas oo ay ku jirto dib-u-qiimaynta kahor intaa isbeddel muhiim ah lagu samayn meeleynta ilmahaaga.

HADDII AADAN KU RAACSANAYN GO'AANKA DEGMADA

Haddii aad aadan oggolayn go'aammada degmada ee ku saabsan qoonsiga, qiimaynta, barnaamijka waxbarasho ama meeleynta ilmahaaga ee hoos timaad Qaybta 504, waxaad weydiisan kartaa dhexdhexaadin ma dhegeysi eex la'aan qaab-socod sharci leh. Adiga iyo ilmahaaguba waxaad xaq u leedihiin inaad ka qaybgashaan dhageysiga oo qareen wakiil idiin noqdo. Weydiisyada Dhageysiga iyo waxayaabha kale ee laga welwelayo ayaa loo samayn karaa isku-duwaha degmada ee Qaybta 504.

Kerince Bowen
12111 NE 1st Street
Bellevue, WA 98005
425-456-4168

Waxaad xaq u leedahay inaad ku xereyso cabasho kala takoor Xafiiska Xuquuqda Madaniga (OCR) ee Waaxda Waxbarashada Mareykanka, ama inaad ku xereyso cabasho maxkamadda federaalka. Guud ahaan, Cabashada Xafiiska Xuquuqda Madaniga ayaa lagu xereyn karaa gudaheeda 180 maalmu taariikheed fiicilka aad aaminsan tahay inu lahaa kala takoorka? Xafiiska degmada ayaa ku yaal 915 Second Ave, Room 3310, Seattle, WA 98174-1099.

Taleefan: 206-607-1600/TDD: 206-607-1647

Barta internetka: www.ed.gov/OCR.